JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA
Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada

SHAQOSIINTA DIBADDA EE SHAQAALAHA / XOOGSATADA SOOMAALIYEED

"HABRAACA IYO ADEEGGA GUUD"

MUQDISHO - SOOMAALIYA

TUSMO BUUGGA

Tusmo	Tusmada Qoraalka	II
Hordhac	Habraaca Guud ee Shaqosiinta Dibadda ee Shaqaalaha Soomaaliyeed	**1 - 3**
Cutubka Koowaad	Eray Bixinno Guud	**4 - 5**
Cutubka Labaad	Adeegga Howlaha Guud eeShaqosiinta Dibadda	**6 - 11**
Cutubka Saddexaad	Duruufaha Shaqada	**12 – 15**
Cutubka Affaraad	Shirkadaha/Hey'addaha ka Shaqeeya Adeegga Shaqosiinta Dibadda	**16 – 20**
Curubka Shanaad	Xadgudubyada iyo Cabashooyinka Shaqaalaha	**21 – 26**
Cutubka Lixaad	Adeegga Daryeelka	**27 – 31**
Cutubka Todobaad	Qodobbo Kala Duwan	**32 – 33**

HABRAACA IYO ADEEGGA GUUD EE SHAQO-SIINTA DIBADDA SHAQAALAHA/XOOGSATADA SOOMAALIYEED

HORDHAC

- Markii la xaqiiqsaday in shaqodoon badan ay diyaar u yahiin in ay ka shaqeystaan dalalka Dibadda, taasoo Kallifeysa in xukuumaddu tixgeliso baahidaas, kadibna ay u habeyso habraac iyo nimadaam guud oo u sahlaya in ay si habsami leh uga faa'ideystan u shaqo tagidda dalalka Dibadda.
- Markii la garawaaqsaday in ay muhiim tahay in la yareeyo xaddiga shaqa la'aanta ka jirta dalka gudihiisa xaaladda iyo duruufaha jira awgood, isla markaana la ilaaliyo xuquuqda, badbaadada iyo sharafta xoogsatada Soomaaliyeed ee daneyneysa in ay si habsami leh uga qeyb qaataan fursadaha shaqo-siinta dibadda, iyagoo adeegsanaya kartidooda iyo heerarkooda aqooneed intaba.
- Xukuumadda Soomaaliyeed markii ay ku tallaabsatay dib u soo nooleynta heshiisyadii laba geesoodka ahaa ee u dhaxeeyay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS) iyo dalalka Shaqaalaha qaadanaya, sida heshiiskii labo geesoodka ahaa ee sanadkii 1983 lala galay Dalka Qadar, dib u soo nooleyntaas waxay muhiim u tahay xoojinta iyo meel marinta habraaca shaqosiinta dibadda, isla markaana ka hortageysa qulqulka Xoogsatada Soomaaliyeed ee aan laheyn waqtigan xaadirka ah habraac shaqo-siineed iyo hishiisyo shaqo oo sharciyeysan.
- Markii la arkay iney laga maarmaan tahay xaqiijinta kaalinta Shirkadaha/Hay'adaha gaarka loo leeyahay ee Soomaaliyeed gaar ahaan ka qeyb-qaadashoodada adeegyada shaqo-siinta dibadda iyo gudaha ee xoogsatada Soomaaliyeed.
- Markii la garwaaqsaday in ay lagama maarmaan tahay kaalinta xukuumadda Soomaaliyeed ee ku aaddan la socodka, kormeeridda iyo qiimeynta adeegyada kala duwan ee shaqo-siinta dibadda, waxaa waajib noqotay in Xukuumadduay markii ugu horeysay u dejiso nidaam iyo habraac habaynaya guud ahaan adeegga shaqo-siinta dibadda ee Xoogsatada Soomaaliyeed ee mustaqbalka.

  Haddaba, habraaca iyo adeegga guud ee shaqo-siinta Shaqaalaha/Xoogsatada Soomaaliyeed, wuxuu ka koban yahay guud ahaan Todaba (7) Cutub oo kale ah:

  - **Cutubka kowaad**: wuxuu tilmaamaya qodobbo guud, kuwaasoo isugu jiro magaca, xuduudda/seeradda dhaqangelinta iyo qeexidda eray bixinnada loo adeegsado mowduuca qoraalka idil ahaantiisa.
  - **Cutubka Labaad:**wuxuu caddeynayaa Shaqo qorista, Noocyada Adeegyada, Mamnuucidda Shaqosiinta Sharci Darrada ah, Howlaha Asaasiga u ah Shaqo-siinta

Dibadda, Waajibaadka iyo Diyaarinta Warbixinnada, Heerka waxbarashada iyo qiimaynta awoodda xirfadeed ama mid farsamo, Diyaarinta Barnaamijka Hanuunita iyo Wacyogalinta, Baaris Caafimaad, Khidmadda la daboolaya, Khidmada Adeegga Wasaaradda (Service Fee), Habraaca iyo Adeegga guud, Faafaahin Hannaan Maamul, Magacaabidda ku qeybsanaha Arrimaha Shaqada (Labour Attachee), Guddiyadda ka howl gala Arrimaha Shaqo Siinta Dibadda.

- **Cutubka Saddexaad:** Wuxuu tilmaamayaa:Xaaladaha Shaqo, Qaabka iyo Muunada (Sample) Heshiiska Shaqo siinta, Adeeg Guud, Awoodda go'aan Qaadashada, Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha
- **Cutubka Affaraad:**Wuxuu faahfaahin ka bixinayaa: Shuruudaha u Qalmidda Rukhsadda,Oggolaanshaha Rukhsad Shaqosiin Dibadeed, Diiwaangelinta Shirkadda/hey'adda iyo heshiiska Shaqo-siinta Dibadda waa in, Muddada Rukhsadda, U Qalmid La'aanta Rukhsadda, Shirkad/Hey'ad kasta waxaa waajib ku ah in, Shirkad/ Hay'ad kasta oo shaqo-siin dibadeed waxaa waajib ku ah in ay, Cusbooneysiinta Rukhsadda, Bixinta Shahaaddo iyo Dhiiri Gelin Munaasib ah, Xayeysiin iyo Sharuudaha Shaqo qorista, Habraaca Shaqo Qorista Shaqaalaha/Xoogsatada Dibadda, Ansixinta Heshiiska Shaqada, Diyaarinta Dhoofka Shaqaalaha/Xoogsatada iyo Wararkooda.
- **Cutubka Shanaad:**Wuxuu tilmaamayaaXadgudubyada , Noocyada Sharci Darrada iyo Khaladaadka, Talaabooyinka, Xaaladaha iyo Halbeegyada ku Meelgaarka ah, Tallaabooyinka Maamuleed, Natiijada iyo Cawaaqibka Fal Sharci daro ah ee jojinta ama Burinta (tirtiridda) Rukhsadda, Gudbinta Cabashooyinka / Dacwadaha, Nuxurka Cabashada / Dacwadda, Dhageysiga Cabashada/Dacwadda iyo Amarka Fulinta go'aanka
- **Cutubka Lixaad:** wuxuu caddeynayaa Dammanadda Maaliyedeed, Ceymis Gelin Shaqaale, Mas'uuliyadda, Xoojinta Waxqabadka, La socod ka Fasaxyada Shaqaalaha, Dhexdhexaadinta , Dib u soo dhoofinta Shaqaalaha/Xoogsatadda, Xadgudubyada ay sameeyaan loo shaqeeyaha iyo wakiilka Hay'adda/Shirkadda, Natiijada sharci ee ku saleysan go'aan Qaadashada, Sharci darradda ay ku kacaan shaqaalaha.
- **Cutubka Todobaad:**wuxuu sheegayaa Go'aaminta Tirada Hay'adaha/Shirkadaha Shaqosiinta iyo wakiilladooda , Xallinta Khilaafaadka Dacwadaha iyo Doodaha Shaqada , Muddada Dacwada Shaqada, Awoodda Soo Saaridda Xeer Nidamiyaal Maamul, Waajibaadka iyo iskaashiga , Qodobbada Marxaladda kala Guurka.

CUTUBKA KOWAAD

ERAY BIXINNO GUUD

Eray Walba fasiraadiisa waxaa loo fasirayaa macnaha oo halkan ugu jiro

1. **Magaca, Seerada Habraacan iyo Adeegga Guud:**

- ✓ Magaca habraacan wuxuu noqonayaa: ***Shaqosiinta Dibadda ee shaqaalaha/xoogsatada Soomaaliyeed*** "***Habraaca iyo Adeegga Guud"***

  Seerada Habraaca: habraacan iyo adeega guud ee shaqosiinta dibadaa waxaa lagu dhaqayaa, laguna maamulayaa dhammaan shaqodoonka Soomaaliyeed marka laga reebo kuwa da'doodu ka yartahay 18 Sano, Adeegeyaasha Guryaha iyo Xafiisyada gaarka ah.

- ✓ Habraacan waxaa lagu talgalay shaqosiinta shaqodoonka Soomaaliyeed iyadoo aan lagu kala soocin Jinsi, Isir, Aragti iyo Qabyaalad, laguna saleeyo oo keliya muteysi loola jeedo karti, aqoon, waayo aragnimo iyo hufnaan.

Soo Jeedinta Habraacan: habraacan iyo adeega guud wuxuu soo jeedinayaa arrimaha soo socda:

b. In la abuuro, lana dhiirigilyo Shirkado/Hey'ado maxalli ah oo fuliya shaqosiinta dibadda ee shaqaalaha/xoogsatada Soomaaliyeed.

t. Magacaabista ku qeybsanayaal shaqo ee dalalka ay naga dhaxeeyaan heshiisyo labo geesood ah oo ku aaddan shaqosiin dibadeed.

j. In shaqosiinta dibadda ee soomaaliyeed aysan ka qeyb geli karin adeegayaasha guryaha iyo xafiisyada gaarka ah.

x. In la magacaabo guddi korjoogteyn ah oo ka kooban golaha Wasiirrada gaar ahaan Wasaaradaha sida tooska ah/si dadban ay u khuseyso shaqosiinta dibadda.

2. **Qeexid:**

Ereyadan hoose, haddii aan si kale loogu qeexin qoraalka dhexdiisa, waxaa loola jeedaa micnahooda sida eray walba ku hor qoran:

b. Hay'ad /shirkad: Waxaa loola jeedaa Hay'ad / shirkad kasta oo aan ahayn mid dowladeed ee u diyaarineysa Shaqaale lo-shaqeeye dibadeed, iyadoo fulineysa habraacan iyo Adeegga Guud ee Shaqa siinta Dibadda qodobbadiisa kale duwan.

t. Rukhsad: Waxaa loola jeedaa oggolaansho Shaqqo siin diabadeed oo ay bixiso Wasaardda.

j. Shaqaale: waxaa loola jeedaa shaqsi haysta heshiis shaqo uu la galay loo shaqeeeye ama hay'ad ama Shirkad si waafaqsan habraacan iyo Adeega guud ee Shaqqo-siinta dibada.

x. **Shaqo-siin toos ah**: waxaa loola jeeda xiriir shaqo-siineed ee u dhaxeeya loo-shaqeeye iyo shaqaale, iyadoo ay xiriirkaasi qeyb ka ahayn hay'ad dowladeed ama shirkad gaar ah.

Kh. Loo-shaqeeye: waxaa loola jeedaa qof kasta oo shaqo siiya hal qof ama wax ka badan, isagoo arrinkaas u maraya shirkad gaar ah oo shaqo-siineed ama wasaaradda.

d. Qoys: waxaa loola jeeda lamaanayasha, carruurtooda iyo waalidiintooda.

r. **Xaalad shaqo ama shil xirfadeed:** Waxaa loo qaadanaya sida ku tilmaaman xeerka shaqada Soomaaliyeed ee dhaqan galka ah.

s. **Shahaadada kartida xirfadeed**: waxaa loola jeedaa shahaaddo aqoonsi ah oo ay bixiso shirkad/hay'ad oo ay aqoonsatay Wasaaradda, taasoo ay ku xaqiijineysa aqoonsigeeda in sitaha uu awood iyo karti u leeyahay waxqabadka iyo fulinta xirfad ama howl gaar ah muddo xaddidan.

Sh. Ergo: waxaa loola jeedaa "Safaaradaha Soomaaliyed", ergada joogtada ah, xafiisyada Qunsuliyadaha, xafiisyada ganacsiga iyo xafiisyada ku qeybsanaha arrimaha shaqaalaha ee safaaradaha dibadda ... iwm.

Dh. Wasaarad: waxaa loola jeedaa "wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha bulshada"

c. **Heshiis laba-geesood ah:** waxaa loola jeedaa heshiis u dhaxeeya jamhuuriyadda Federalka ee Soomaliya iyo dalka doonaya Shaqosiinta Shaqaale Soomaaliyeed, iyadoo la raacaya guud ahaan habraaca iyo Adeegga Guud ee Shaqosiinta dibadda ee Shaqaalaha Soomaaliyeed ee Dalka.

g. Eray kasta ee ku aaddan laboodnimo waxaa loo qaadanaya iney ku jiraan haweenka.

CUTUBKA LABAAD

ADEEGGA HOWLAHA SHAQOSIINTA GUUD

QEYBTA KOWAAD

Adeegga iyo Howlaha Shaqosiinta

3. **Shaqo qorista:**

   b. Wasaarada waxey fulinaysaa adeegyada shaqasiinta dibadda ee la xariira shirkadaha/hey'adaha dalalka qaadanaya xoogsatada Soomaaliyeed, taasoo ku saleysan mar kasta heshiishyada ka dhaxeeya Xukuumadda iyo Xukuumad kale.

   t. Wasaarada waxay la kaashaneysaa shaqosiinta Dibadda hey'adaha kale ee dowladda oo aan looga maarmin wada shaqeyn toos ah.

4. **Noocyada Adeegyada:** Adeegyada ay fulin doonto Wasaaradda ee lagu faahfaahiyay habraacan iyo Adeegga guud ee Shaqasiinta Dibadda, iyada oo ka duuleysa arrimaha la xiriira meel marinta habraaca shaqosiinta xoogsatada ee loo dhoofinaayo Dalka Dibadiisa. Sidaas dardeed, Wasaaradda waxey si joogta ah ku kor meereysaa howlaha ay qabanaayaan shirkadaha/hey'adaha shaqosiinta dibadda sida: kala xulashada, baarista caafimaadka, ansixinta heshiisyada shaqada, hanuuninta iyo wacyagelinta shaqaalaha dhoofka ka hor iyo dhoofkooda ka dib, u fududeynta safarka shaqaalaha diyaarka ah ee la xushay

5. **Mamnuucidda Shaqosiinta Sharci Darrada ah:**

   5.1 lama qori karo si toos ah shaqaale, iyada oo aan la soo marin Wasaaradda. Shirkad/hey'ad ma qori karto shaqaale Dibadda loo dhoofinaayo haddii aysan oggolaansho ka heysan Wasaaradda

   5.2 Wasaaradda keliya ayaa bixin karta shaqo qoris shaqaale toos ah, iyadoo laga duulayo sababaha soo socda awgood:

   b. Haddii loo shaqeeyuhu yahay ergada Soomaaliyeed ee dibadda

   t. Haddii loo shaqeeyuhu yahay hay'ad caalami ah.

   j. Haddii shaqo doonku yahay mid si gaar ah u helay fursad shaqo (jago) oo aan ahayn Adeegayaasha howlaha guryaha iyo xafiisyada gaarka ah.

   5.3 Bandhigidda iyo xayeysiinta fursadaha/jagooyinka bannaan ee xakuumaduhu soo dalbadaan ee khuseeya shaqosiinta tooska ah waxaa sameyn kara oo keliya Wasaaradda.

6. Howlaha Asaasiga u ah Shaqosiinta Dibadda:

6.1 Dhinacyada uu khuseeyo heshiiska shaqo qorista Dibadda, waa in ay yihiin kuwa waafaqsan Shuruucda Shaqada dalka, habraaca iyo Adeegga Guud ee Shaqosiinta dibadda ee Shaqaalaha/Xoogsatada Soomaaliyeed.

6.2 Arrinta la xiriirta heshiisyada u dhexeeya shaqaalaha / xoogsatada iyo loo shaqeyayaasha, waxaa lagama maarmaan ah inuu ka tarjumo, lana waafajiyo Qodobbada ay tilmaamayaan xeerka shaqada ee JFS iyo kuwa dalalka qoranaya ama dalbanaya shaqaalaha/xoogsatada Soomaliyeed.

6.3 Habraacan iyo Adeegga Guud, wuxuu soo dhaweynayaa xuquuqda dheeriga ah ee loo fidinaayo Shaqaalaha/Xoogstada, xuquuqdaas oo aan lagu tilmaamin heshiisyada shaqosiinta Dibadda ee shaqaalaha Soomaaliyeed.

6.4 Shirkad/Hey'ad Waxaa loo oggol yahay in ay qaadato hal Rukhsad kaliya oo shaqosiin dibadeed ah.

6.5 Waxaa ka reeban Maamulka iyo Madaxda sare ee Shirkad/Hey'ad shaqosiineed in ay ka mid noqdaan Shirkad/Hey'ad kale ee shaqosiin dibadeed.

7. Waajibaadka iyo Diyaarinta Warbixinnada:

7.1 Hay'adda / shirkadda kasta, Ergooyinka Soomaaliyeed ee Dibadda iyo Safaaradaha waxaa waajib ku ah in ay soo Diyaariyaan xogta iyo Macluumaadka ku saabsan xaaladda Shaqosiinta iyo meeleynta shaqaalaha loo dhoofiyay dalalka ay joogaan, ka dibna ay u soo gudbiyaan Wasaaradda iyadoo waqtiyeysan oo tifafitiran, kuna salaysan guud ahaan xaaladda dhabta ah iyo duruufta shaqada ee xoogsatada Soomaaliyeed ee Dibadda.

7.2 Wasaradda, waxay soo saari doontaa qaab iyo Nidaam tilmaamaya waqtiga xogta iyo Macluumaadka loogu soo gudbinaya wasaaradda.

7.3 Wasaaradda, waxay iskuduwi doontaa xogta, Macluumaadka iyo warbixinnada ku xusan farqadda (7.1) ee sare ku tilmaaman, ka dibna waxay la wadaagi doontaa Hay'adaha ay khuseysa siyaasadda guud ee Arrimaha Bulashada iyo Dhaqaalaha Dalka.

QAYBTA LABAAD

Waxbarashada, Tababarrada Iyo Baarista Caafimaadka

8. Heerka waxbarashada iyo qiimaynta awoodda xirfadeed ama mid farsamo.

Shaqaale kasta oo doonaya inuu ka qeyb galo Shaqo siinta dibadda, waxaa looga baahan yahay inuu:

b. Qori karaa / Aqrin karaa Afka Soomaaliga, iyadoo loo tixgelinaayo luqadaha kale

t. Haysto ugu yaraan shahaaddo muujineysa kartidiisa xirfadeed/Farsamo oo ay bixisay mid ka mid ah xarumaha Tababarka ee Wasaaraddu aqoonsatay.

j. Shaqaalaha leh aqoonta sare ee Jaamacadaha, waxaa loo baahan yahay in shahaddadooda ay ka soo tasdiiqaan Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta sare iyo Wasaarada Arrimaha Dhibadda ee J.F. Soomaaliyeed.

x. Soo dhamaystiro sharuudaha kale ee loo shaqeeyuhu Dalbaday.

9. **Diyaarinta Barnaamijka Hanuunita iyo Wacyogalinta**

Wasaaradda ama ciddii ay u wakiilato waxaa laga rabaa:

9.1 In ay sameyso wacyigelin iyo hanuunin ku beegan safarka ka hor, taas oo la siinayo Shaqaalaha loo qaatay shaqosiin dibadeed, iyadoo la faham siinayo shaqo Qeexidda jagadooda, Xuquuuqdooda, Waajibaadkooda intaba.

9.2 In ay dhaqan geliso si joogta ah wacyigelin qaran ee dadweynaha loogu soo bandhigayo Qalabka warbaahinta Soomaliyeed gaar ahaan xaaladaha iyo warbixinnada ku aaddan macluumaadka la xariira guud ahaan shaqosiinta dibadda, faa'iidooyinkeeda iyo caqabadaha ka jiri kara dalkaas.

9.3 In ay u sameyso si joogta ah wacyigelin iyo hanuunin Guddiyada Maamulka hay'adaha/Shirkadaha, Maareeyayasha guud iyo Shaqaalaha gaar ahaan ku howlan arrimaha la xariira Shaqosiinta dibadda.

9.4 In ay u howlgasho diyaarin wacyagelin iyo hanuunin lagu soo jiidanayo, laguna kasbanaayo indhaha loo shaqeyayaasha dibadda, gaar ahaan xaaladaha Shaqo siinta shaqaalaha Soomaliyeed, Adeegyadda Jira, iyo Habraacyada, tilmaamaha iyo heerka shaqo ee shaqo siinta dibadda.

10.Baaris Caafimaad

10.1 Baarista caafimaaka shaqaalaha, waxaa samayn kara Hay'ad caafimaad oo ay soo wada xuleen Wasaaradda iyo Shirkada/Hay'adda Shaqaalaha Qaadeysa.

10.2 Hay'adda/shirkadda shaqo siinta dalka ayaa shaqaalaha u diri doonta Baaris caafimaad, ka dib markii uu shaqaaluhu soo buuxiyo Dhammaan sha ruudihii loo shaqeeyaha uu soo dalbaday.

10.3 Haddii ay dhacdo in shaqaalaha looga baahdo in uu sameeyo Baaris caafimaad hal mar wax ka badan, waxaa kharashka (lacagta) dheeriga dabooli doonta/ shirkadda ama Hay'adda.

QAYBTA SADDEXAAD

Kharashka Adeegga (Service fee) ee Shaqo Siinta

11. Khidmadda la daboolaya

11.1 **loo Shaqeeyaha wuxuu daboli donaa khidmooyinka soo socda: -**

b. Khidmadda (fee) dalkugalka (visa) ee dalka shaqada loo tagayo

t. Qiimaha tikidka safarka (sii socod iyo soo noqosho)

j. Khidmadda (fee) oggolaanshaha shaqada (work permit fee)

x. Khidmadda (fee) fasaxa deganaanshaha (Resident Permit fee)

kh. Kharashka tasdiiqidda dokumentiga Shaqaalaha

d. Khidmadda (fee) adeegga iyo aqoonsiga heshiiska shaqo siinta (Employment Contract Approval Service fee)

11.2 Iska bixinta kharash ee shaqaalaha

b. Khidmadda soo saarista Baasaboorka

t. Qiimaha caddeynta "Dembi La'aanta".

j. Khidmadda hore Baarista caafimaadka (Medical Examination fee)

x. Khidmadda tallaalka (Vaccination fee)

kh. Khidmadda soo saarista "Warqadda Dhalashada" iyo tan "Asluub wanaagga"

c. Khidmadaha kala duwan ee ku baxaya "Shahaadada kartida xirfadeed/Farsamo" iyo Aqooneed.

12. **Khidmada Adeegga Wasaaradda (Service Fee)**

Shirkadda/ Hay'adda waxay bixinayaan Khidmadda (fee) adeegga ***Oggolaanshaha iyo ansixinta heshiiska shaqo siinta dibadda shaqaalaha/Xoogsatada Soomaaliyeed.***

QEYBTA AFFARAAD

Nidaamka Shaqa siinta Dibadda

13. Habraaca iyo Adeegga guud ee shaqosiinta dibadda, waxay si rasmi ah meel mar u noqonayaan haddii uu jiro heshiis Labo geesood ah oo u dhexeeya Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya iyo dal kale oo Shaqaale Soomaaliyeed ka Shaqeynayaan.

14. **Faafaahin Hannaan Maamul:**

Wassaradda waxay soo saari doontaa Hannaan Maamul oo tilmaamaya qaabka loo fulinaya xilka iyo waajibaadka habraaca guud ee Shaqo siinta Dibadda

15. **Magacaabidda ku qeybsanaha Arrimaha Shaqada (Labour Attachee)**

15.1 Wasaradda, waxay magacaabeysaa "ku qeybsanaha Arrimaha Shaqada" oo ka howlgali doona Safaaradda Soomaaliyeed ee ku taal dalka shaqaalaha Soomaaliyeed ay tagayaan, si loo xaqiijiyo ilaalinta xuquuqda, badbaadada iyo sharafta / karaamada xoogstada Soomaaliyeed ee Dibadda ka shaqeysata.

15.2 Wasaaradda Arrimaha Dibadda, waxay fududeyneysaa dhameystirka Habraaca Magacaabista ku qeybnsaha Arrimaha Shaqaalaha ee Safaaradaha Soomaaliyeed ee Dibadda.

15.3 Xilka iyo waajibaadka ku qeybsanaha Arrimaha Shaqada (Labour Attachee) waxaa ay ku kooban tahay Faqradda 15.1, hase yeeshee wasaradda ayaa si buuxda u faahfaahin doonta shaqo qeexidda ku qeybsanaha Arrimaha Shaqada (Labour Attachee).

16. Guddiyadda ka howl gala Arrimaha Shaqo Siinta Dibadda

16.1 Waxaa la magacaabayaa Guddi heer Wasiir ah oo noqonaya guddi korjoogteyn (Oversight Committee) kaas oo mas'uuliyadiisu tahya iskuduwidda shaqosiinta Dibadda, si loo ilaaliyo xuquuqda iyo karaamada shaqaalaha Soomaaliyeed, loogana hortago qulqulka shaqaalaha aan sharciyeysaneyn. Guddiga howlihiisa waxay ku faafaahsan yihiin (16.2) ee hoos ku xusan.

16.2. Guddiga kor joogteynta (Oversight Committee) wuxuu ka kooban yahay:

b. Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada……. Guddoomiye

t. Wasiirka Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga……..... Gudoomiye Xigeen

j. Wasiirka Maaliyadda…….. Xubin

x. Wasiirka Amniga…… Xubin

kh. Wasiirka Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ……... Xubin

d. Qareen katirsan Xafiiska Garyaqaanka Guud----------Xubin

16.3 Guddiga kor joogteynta (Oversight Committee), waxaa Xogheyn u noqonaya Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (Agaasinka Sharciyada iyo Xiriirka Shaqaalaha). Guddiga kor joogteynta (Oversight Committee) ee isku duwidda wuxuu yeelanayaa Awoodaha iyo waajibaadyada soo socda:

b. Xaqiijinta habsami u fulinta qodobbada kala duwan ee Habraaca shaqosiinta Dibadda Shaqaalaha /Xoogsatada Soomaaliyeed.

t. Kormeeridda shirkadaha/hey'addaha diyaariya shaqaalaha loogu talo galay iney ka Shaqeeyaan Dibadda dalka.

j. Sameynta Daraasado / Cilmi baaris ku aaddan qaabka mar kasta loo geli karo heshiis laba geesood ah ee cusub, gaar ahaan dalalka qaabila shaqaalaha si shaqo abuur Dibadeed loogu helo shaqaalaha Soomaaliyeed ee shaqo doonka ah.

x. Sare u Qaadida xiriirka iyo iskaashiga Wasaaradda iyo hay'adaha/shirkadaha si looga hortago xad gudubyada iyo sharci darrada saameeyn karta xuquuqda, karaamadda iyo Badbaadada shaqaalaha Soomaaliyeed.

Kh. Dhiiro gelinta fursado Shaqo dibadeed si loo yareeyo Tahriibka, Burcad Badeeda iyo ka faa'ideysiga qulqulka Sharci darrada ah ee dhallinyaradda

d. Wacyi gelinta Dadweynaha si loo joojiyo howlaha la xiriira shaqo siinta sharci darrada ah ee tooska.

r. Fududeynta iyo abaabulka qaabkii loo sameyn lahaa xarun casri ah oo qalabeysan, laguna keydin doono xogta iyo macluumaadka howlaha shaqo siinta Dibadda ee Shaqaalaha iyo Macluumaadka Suuqa Shaqada Dalka Soomaaliyeed.

CUTUBKA SADDEXAAD

DURUUFAHA SHAQADA

QEYBTA KOOWAAD

Nidaaminta iyo Go'aaminta Duruufaha Shaqo

17. Xaaladaha Shaqo:

Wasaaradda waxay soo saari doontaa awaamir Rasmi ah oo ku aaddan Duruufaha Shaqo ee la xiriirta Suuqa Shaqada iyo arrimaha Bulshada iyadoo ka duuleysa xeerka Shaqada Soomaaliyeed.

18. Qaabka iyo Muunada (Sample) Heshiiska Shaqo siinta:

Wasaaradda waxay diyaarin doontaa "Qaabka heshiiska Shaqada" kaas oo muunad ahaan shirkadaha/hay'aduhu adeegsan doonaan, waana sida soo socoto nuxurkiisa guud ee asaasiga ah:

b. Waqtiga iyo Saacadaha Shaqada

t. Mushaarka iyo dheefaha kale

j. Ugu yaraha Mushaarka (Minimum Wage) ee dalka qaadanaaya Shaqaalaha.

x. Fasaxyada Shaqaalaha

kh. Gaadiidka iyo Isgaarsiinta

d. Ceymiska, Caafimaadka iyo nolosha

r. Degaanka, Jiif, Cuntada iyo Xannaanada kale

s. Xaquuqda, Badqabka iyo Caafimaadka Shaqaalaha

18.1 Markii qaabka Nuxurka heshiiska Shaqosiinta la diyaariyo sida ay tilmaamaysa qodobka (18) ee habraacan, waxaa muhiim ah in la tixgeliyo arrimahan hoos ku qoran:

b. Dhaqanka, Caadooyinka, Habka nolasha, Shuruucda Shaqada iyo arrimo Bulashada ee dalka loo dhoofinaya Shaqaalaha Xoogsatada Soomaaliyeed, sidoo kale lana ilaaliyo Dhaqanka, Diinta iyo Sharafta Shaqaalaha / Xoogsatada Soomaaliyeed.

t.Heshiisyada Laba geesoodka ah oo ay JFS la saxiixatay dalalka loo dhoofinaya Shaqaalaha Soomaaliyeed. Heshiisyada Caalamiga ah ee khuseeya arrimaha Shaqada.

j. Xaaladda Suuqa Shaqda ee Dalka JFS.

QEYBTA LABAAD

Adeegga Baarista Shaqada

19. Adeeg Guud

19.1 Wasaaradda, si ay u xaqiijiso, una hubiso sharcinimada Shaqaalaha aadaya, una dhoofaya shaqo siin dibadeed, waxaa la siin doonaa warqad Aqoonsi gaar ah oo loogu talo galay in la siiyo Dhammaan kuwa heshiiskooda shaqo siinta la ansixiyay (Approved).

19.2 Wasaaradda, waxay Magacabeysaa "Baare Shaqo" (Labour Inspector) oo daba galaya hay'adaha/Shikadaha ku howlan shaqo siinta Dibadda ee shaqaalaha/xoogsatada Soomaaliyeed. Hay'adaha / Shirkadaha waxaa waajib ku ah fulinta xilka iyo Mas'uuliyadaha ay u Xilsaaran yihiin ee ku qoran Habraacaan.

20. Awoodda go'aan Qaadashada

20.1 Wasaaradda waxay leedahay awoodda dhegeysiga iyo go'aan qaadashada arrimaha Maamuleed ee la xiriirta ku xad gudubka habraacan iyo Tusaalooyinka ee la xariira loo shaqeeyaha ama wakiillada shirkadaha / hay'adaha ama shaqaalaha intaba.

20.2 Wasaaradda sida: dib u soo celinta lacago (Kharaj) si sharci darro ah looga qaaday shaqaalaha / Xoogsatada Soomaaliyeed

20.3 Arrintan waxaa lagu muujinaya shahaado ka qeyb gal ee shirkada / Hay'adda magaceeda ku qoran yahay.

20.4 Wasaaradda waxay ku dadaaleysaa xaqiijinta shuruudaha Rukhsad helidda in la soo buuxiyo iyo in kale sida uu qabo habraacaan Guud ee shaqo siinta Dibadda

21. Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha

b. Wasaaradda iyo Wasaaradda Arimaha Dibadda ayey saaran tahay mas'uuliyadda xaqiijinta iyo ilaalinta xuquuqda, badqabka, sharafta iyo karaamadda shaqaalaha/xoogsatada ee helay shaqo siin dibadeed iyagoo xushmeysan.

t. Wasaaradda, oo gudaneysa waajibaadka saaran ee xoojinta gacan siinta shaqaalaha si cabashadooda wax looga qabto,

j. Wasaaradda iyadoo kaashaneysa meelaha ay si toos ah u khuseyso ee arrimaha shaqaalaha, waxaa muhiim ah in ay abuurto jawi sahlaya is dhaxgal, kalsooni ay ku jirto shaqaalaha dhexdooda guud ahaan, gaar ahaanna shaqaaalaha fursadda shaqo siinta dibadeed helay.

x. Wasaaradda, waxay siin doontaa caawinaad iyo talo sharci shaqaalaha dhibaatada ka soo gaartay dibadda muddadii uu jiray xiriirka shaqo siineed.

21.1 Baare shaqo kasta oo ay si rasmi ah u soo magacawday Wasaaradda, wuxuu yeelanayaa awoodaha iyo waajibaadka soo socda:

b. Inuu kormeero, isla markaana uu hubiyo in hay'adda / shirkadda ay leedahay xafiis jira oo ay u dhan yihiin qalabkiisa iyo agabkiisa muhimka u ah shaqadiisa gaarka ah.

t. In shirkadda / hay'adda ay leedahay goob ama hool munaasib ah oo lagula kulmi karo Shaqaalaha, loogana qaadi karo wareysi iyo imtixaannaada, laguna sameyn karo wacyigelinta, kulamada iyo hanuuninta shaqada iyo Adeegga La-talinta

j. In Baaruhu garwaaqsado in shirkadda / Hay'adda ay u dhan yihiin dhamman arrimaha ku xusan farqada (b iyo t) ee kor ku tilmaaman, inta aan la siinin, ama loo cusbooneysiinin Rukhsadda ama isbeddel kasta oo ku yimaada Ciwaanka iyo Goobta shaqada ee Hay'adda/Shirkadda ay degganeyd, kaasoo loo baahanyahay inuu ahaado mid la yaqaan oo caan ah.

x. In hay'adda / shirkadda ay leedahay xafiis / Bar keydinta Macluumaadka oo casriyeysan oo xogaha shaqaalaha si fududna loo heli karo haddii loo baahdo.

Kh. In Baaruhu uu xaqiijiyo in Hay'adda / Shirkadda bixsay Hanuunin la xiriirta Duruufaha shaqada guud ahaan, xaaladda dalka qaadanaya shaqaalaha iyo shaqo siinta dhoofka ka hor iyo ka dib.

d. In Baaruhu uu sameeyo Baaris dhammeystiran waqti kasta oo suurtagal ah ama la soo wargeliyo in Hay'adda/ Shirkadda ay xad gudub ku sameysay habraacan iyo Adeegga guud ee la xiriira shaqo siinta Dibadda shaqaalaha/ Xogsatada Soomaaliyeed.

r. In Baaruhu uu dabagal, kormeer xilliyeysan iyo qiimeyn guud ku sameeyo

Hay’adda / Shirkadda si looga hortago in ay timaado shaqo qoris iyo dhoofin Shaqaale dalka dibaddiisa oo ah sharci darro.

s. In baaruhu geli karo xafiisyada Hay’adda / Shirkadaha gaar ahaan saacadaha shaqada si uu u qiimeeyo xogta ku keydsan Diiwaannada iyo Buugaagta.

21.2Baaraha shaqada waxaa looga baahan yahay:

b. In uu sito, haddii loo baahdana tusiyo Aqoonsigiisa Baarinnimo si uu u fuliyo waajibkiisa shaqo Shirkadda/hey’adda uu baarayo

t. Inuu soo diyaariyo warbixin bille ah oo ku aadan baarista shaqada

j. Inuu u soo gubiyo Wasaaradda Natijooyinka Baarista Shaqada ee uu sameeyay, isagoo soo raacinaya Talooyinkiisa sharci iyo Tallaabooyinka in la qaado mudan.

x. Wasaaradda waxay soo saareysaa Talooyin lagu saxayo, laguna toosinaya Khaladaadka lagu soo ogaaday Baarista shaqo iyo habraaaca in la maro ay tahay mustaqbalka.

Kh. Baaraha shaqada, waxaa lagula xisaabtami doonaa, xadgudub kasta ee uu la yimaado, Isagoo ka faa’ideysanaya Awoodda uu habraacan siiyay inuu ku dhaqmo / adeegsado.

d. Shirkadda/Hay’add kasta waxaa waajib ku ah in ay gacan ka geysato habsami u dhaqan gelinta mas’uuliyadaha uu xambaarsan yahay Baaraha shaqada ee Wasaaradda.

CUTUBKA AFFARAAD

SHIRKADAHA/HEY'ADDAHA KA SHAQEEYA ADEEGGA SHAQOSIINTA DIBADDA

QEYBTA KOWAAD

Shirkadaha/Hey'adaha u Qalma Rukhsad Shaqosiin Dibadeed

22. Shuruudaha u Qalmidda Rukhsadda

22.1 Shirkad/Hay'ad fulisa shaqo siin Dibadeed waxaa shardi ah in ay:

b. Tahay shirkadda/hey'ad saamiley ah oo leh jiritaan Qaanuuni.

t. Ka heysato Shati Wasaaradda Ganacsiga

j. Leedahay Magac iyo Astaan u gaar ah oo aan lala wadaagin

x. Leedahay xafiis iyo ciwaano rasmi ah

kh. ku leedahay xisaab socota (current Account) Bangiyada Ganacsiga ee la aqoonsan yahay

d. Heysato Raasimaal Shillin Soomaali u dhigma US $ 60.000 (Lixdan Kun Dollar) Seddaxda bilood ugu dambeysay kuna caddahay waxbixinta Xisaabta Bangiga (Bank Statement)

r. In aan lagu laheyn Canshuur Dowladeed

s. Leedahay qaab dhismeed iyo maamul sharci ah

sh. Saamileyda iyo Maamulkeda in ay yihiin Muwaadiniin Soomaaliyeed

dh. Waa in aan hore loogu diidin ama looga qaadin Rukhsad shaqo sii dibadeed

c. Ku dhicin xukun Maxkamadeed oo dhaqan galay

22.2 Saraakiisha Dowladda oo mas'uulka ka ah dhaqan galinta habraacaan guud uma qalmaan in la siiyo Rukhsad shaqo siin dibadeed sida kuwa dano toos ah ama dadban ku yeelan kara ee ka shaqeeya: Wasaaradda Shaqada, Wasaarada Arrimaha Dibadda, waaxda Socdaalka iyo

Jinsiyadaha, Ciidamada Nabadgalyada, Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee Dibadda iyo Safaaradaha ama Qoysaska shakhsiyaadka sare ku xusan.

23. Oggolaanshaha Rukhsad Shaqosiin Dibadeed

Shirkad/hey'ad kasta oo soo buuxisa shuruudaha ku xusan Qoddobka (22) ee kore, soona codsata oggolaansho Rukhsad shaqo siin dibadeed waa in:

b. Ay u soo gudbisaa codsi Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada gaar ahaan Waaxda Sharciyada iyo Xariirka Shaqaalaha.

t. Ay bixiso Khidmadda Rukhsadda

j. Soo buuxiso form-ka shaqo siinta dibadda ee Wasaaradda, ka dibna u ay soo gudbiso, iyadoo ay ku lifaaqan yihiin Dokumentiga Soo socda:

x. Macluumaadka guud ee Shirkada/Hey'adda (Profile)

Kh. Magaca gudoomiyaha shirkadda/hey'adda, ku xigeenkiisa iyo gudiga Maamulka

24. Diiwaangelinta Shirkadda/hey'adda iyo heshiiska Shaqosiinta Dibadda waa in:

24.1 Shirkad/hey'ad kasta ee Soomaaliyeed bixisaa Khidmad Diiwaangelin oo dhan Shillin Soomaali u dhigma US $ 1,000 (Kun Doolar kaliya)

24.2 Shirkad/hey'ad kasta bixisaa Khidmadda adeegga iyo aqoonsiga heshiiska shaqosiinta dibadda (Employment Contract Approval Service Fee) oo dhan Shillin Soomaali u dhigma US $ 25 (Labaatan iyo Shan Doolar) ee heshiis shaqo kasta.

25. Muddada Rukhsadda

Ruqsad kasta oo shaqosiin dibadeed, waxa ay ansax ahaanaysaa muddo hal (1) sano ah, laga billaabo maalinta iyo Taariikhda Ruqsadda ay Wasaaraddu bixisey.

26. U Qalmid La'aanta Rukhsadda:

Xaaladaha so socda, waxay keenayaan u qalmid la'aan ku aadan helidda Rukhsadda, kuwaasoo kala ah:

26.1Ku xad gudubka shuruucda, Xeer hoosadyada iyo Amarrada Wasaaradda:

b. Hay'ad/Shirkad kasta oo Saami Wadaag ah oo Rukhsadda guddiga maamulkeeda si ku meel gaara ah loo hakiyey ama la baabiyay.

t. Hay'ad / Shirkad kasta oo Rukhsadeeda la xannibay / joojiyay, Tiro saddex jeer wax ka badan.

j. Hay'ad / Shirkad kasta oo Rukhsad la baabiyay ka dib markii ay ka baaqsatay xallinta cabashooyin liddi ku ah sida: ku xaddgudubka xuquuqda, badbaadada, karaamada iyo sharafta shaqaalaha / Xoogsatadda Soomaaliyeed.

x.Shirkad/Hey'ad kasta oo ku dhacay Xukun Maxkamadeed oo dhaqan galay

QEYBTA LABAAD

Waajibaadka Shirkadda/hey'adda

27. Shirkad/Hey'ad kasta waxaa waajib ku ah in:

b. Ay ku dhejiso nuqul Ruqsadeeda meel muuqata oo munaasib ah oo la arki karo**.**

t. Ay 7 maalmood gudahooda ku wargiliso Wasaaradda isbadal kasta oo ku yimaada Maareynta iyo Maamulka Shirkad/Hey'ad shaqo siin dibadeed.

j. Ay ku baahiso 10 Maalmood gudahood isbaddalka ku yimaada Maareynta guud, gudiga Maamulka Hay'ada/ shirkada shaqo siin dibadeed si ay uga war helaan macaamiisheeda.

x. Ay soo war galiso Wasaaradda haddii ay xafiisyo kale furanayaan.

Kh. Ay soo Wargiliso wasaaradda isbedelka ku yimaada shirkadda/hey'adda Ciwaanka Ganacsiga rasmiga ah.

28. Shirkad/hay'ad kasta, waxaa saaran waajibaad ku aaddan baraarujinta loo shaqeeyaha, ixtiraamiddaiyo Qiimeynta heshiiska shaqosiinta shaqaalaha/xoogsatada ku guuleystay shaqosiin dibadeed.

29. Shirkad/ Hay'ad kasta oo shaqosiin dibadeed waxaa waajib ku ah in ay:

b. Dib ugu soo celiso Dalka shaqaalaha iyo agabkiisa shakhsiga ah (Personal Effects), markii uu dhammaado heshiiska shaqosiinta.

t. Haddii ay Geeri ku timaado shaqaale, loona baahdo in Shirakadu/hey'adda Dalka ay ku soo celiso Marxuumka iyo Agabkiisa gaarka ah, waxaa go'aamineya Wasaaradda goobta ama meesha la keenaya, iyada oo la soo raacinaayo Shahaaddada Geerida (Death Certificate) oo sharciyeysan muddo ku siman (15) Maalmood gudahood.

30.Cusbooneysiinta Rukhsadda

30.1 Rukhsad lagu bixiyay nidaamka habraacaan, waxaa la cusubooneysiin karaa sannad kasta (Sanadkiiba mar)

30.2 Shirkad/ Hay'ad kasta waa in ay Codsigeeda cusbooneysiinta u soo gudbisaa hal bil ka hor dhicidda Rukhsadda.

30.3 Hay'ad / Shirkad kasta waa in ay soo buuxisaa Foomka codsiga ee loo diyaariyay cusbooneysiinta Shatiga, ka dibna loo soo gudbiyo Wasaaradda, iyadoo lagu soo lifaaqaya dekumentiga soo socda:

b. Caddeynta lacagta dammaanadda (Deposit) ee ku xusan habraacaan.

t. Caddeynta Maaliyadda (Financial Statement) oo la hubiyay iyo muujinta in Shirkadda/hey'adda aan lagu lahayn wax canshuur (Tax) dowladeed ah.

j. Warqadda Caddeynta Dembi la'aanta Boliska oo laga rabo Maamulaha Shirkada/hey'adda

x. Warbixin guud oo muujineysa duruufta shaqaalihii/xoogsatadii hore loo dhoofiyay xaaladdooda nololeed iyo cafimaadkooda guud ahaan.

Kh. Heerka fulinta Dukumentiyada kale oo caddeynaya Tusaalooyinka wasaaradda.

30.4 Haddii Hay'adda / Shirkadda ku fullin weyso in ay ku cusbooneysiisato Rukhsada waqtigii loo qabtay, waxaa Rukhsadda loo oggol yahay in loo cusuboneysiiyo Saddax Saddex Bilooad Sannadkii 4 jeer iyo ganaax dhan shan iyo toban doolar (US $ 15) Shilling Soomaali ah

31.Bixinta Shahaaddo iyo Dhiiri Gelin Munaasib ah:

Wasaaradda waxay awood u leedahay in ay bixiso tilmaamo iyo Amarro lagu hagaajinaya fulinta habraacaan, Bixisana sannad kasta dhammadkiisa Abaalmarinno iyo dhiirri gelin Shirkadda/hay'adda oo si heer sare ah u gudata howlaha la xiriir shaqosiinta Dibadda ee shaqaalaha / Xoogstada Soomaaliyeed.

QEYBTA SADDEXAAD

Dhaq-dhaqaaqa iyo Howlaha Adeeggyada Shaqosiinta

32. Xayeysiin iyo Sharuudaha Shaqo qorista

32.1Shirkad/Hay'ad kasta waa in ay soo wargilisaa Wasaaradda inta aysan billaabin hannaanka baahinta shaqo qorista dibadda

32.2 Shirkadda/hay'adda waa in ay keentaa Wasaaradda nuqul xayeeysiinta ka mid ah.

32.3 Shirkad / hay'ad marka ay shaqo siin dibadeed baahineyso waa in:

b. Ay ku xayeysiiyso jagooyinka banaan qalabka warbaahinta rasmisga ee Dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

t. Idaacadda iyo Telefishinka Dowladda

j. Telefishinnada iyo idaacadaha maalinlaha ah ee gaarka loo leeyahay

x. Wargeysyada maalinlaha ah ee Dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyhay

kh. Noocyada kala duwan ee Baraha Bulshada sida: (Facebook, tweeter)

d. Mareegta Wasaaradda iyo shirkada/hay'adda shaqada xayeysiisay

32.4 Xeyeysiinta waa in lagu caddeeyaa:

b. Magaca shirkadda/hey'adda shaqada qoreysa iyo ciwaankeeda oo buuxa

t. Shirkadda/hay'adda shaqaalaha loo qoraayo ciwaankeeda oo buuxa iyo dalka ay ka soo jeeddo

j. Tirada shaqaalaha, Jogooyinka iyo xirfadaha loo baahan yahay

x. Shuruudaha ku xiran jagooyinka ka banaan shirkadda/hay'adda shaqaalaha loo qoraayo

32.5 Xeysiinta waa in lagu baahiyaa ugu yaraan Toban (10) maalmood oo xiriir ah

33. Habraaca Shaqo Qorista Shaqaalaha/Xoogsatada Dibadda:

33.1Shirkadda/hay'adda waa in ay magacaawdaa guddi shaqo qoris oo aqoon, khibrad, xirfad iyo karti u leh howlaha shaqo qorista shaqaalaha, magacyada gudigga iyo waajibaadkooda, waa in lagu soo wargaliyaa Wasaaradda ugu yaraan shan (5) maalin shaqo ka hor.

33.2 Imtixaanka shaqo qorista waxaa lagu qaadayaa xarunta shirkadda/hay'adda ama goobta kale oo la isla oggolaado.

33.3 Shirkadda/hay'adda shaqaalaha qaadanaysa ama wakiilkeeda waa in ay goobjoog ka yihiin goobta iyo waqtiga imtixaan qaadista.

33.4 Waa in la keenaa goobta shaqo qorista dhammaan dukumintiyada ka qeyb galayaasha tartanka shaqo qorista si guddigu u hubiyo.

33.5 Shirkadda /hay'adda shaqosiinta waa in ay sugtaa ammanka goobta imtixaanka lagu qaadayo ayadoo gaashaneysa Ciidanka Amniga.

33.6 Wasaaradda waa in ay goobjoog ahaato, waqtiga imtixaanka la qaadaayo iyo goobta shaqada si loo ilaaliyo sinaanta iyo Caddaalada Bulshada.

34.Ansixinta Heshiiska Shaqada

34.1Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada waxey hubineysaa heshiiska shaqada in uu waafaqsan yahay habraacan iyo shuruucda shaqada Dalka.

34.2 Hashiiska shaqada waxaa laga tasdiiqayaa Wasaaradda Arrimaha Dibadda (JFS) iyo Safaaradda dalka ee shaqaalaha loo qaadayo.

34.3 Saxiixa loo shaqeeyaha/wakiilkiisa rasmiga ah ee ku xusan hashiiska iyo dukumentiyada kale ee ku lifaaqaan waa in ay sugaan (verified) oo xaqiijiyaan safaaradda loo shaqeeyaha uu ka soo jeedo, ka dibna Wasaaradda Arrimaha Dibadda Soomaaliya.

35. Diyaarinta Dhoofka Shaqaalaha/Xoogsatada iyo Wararkooda

35.1 Wasaaradda Arrimaha Dibadda, marka ay soo ansixiso heshiiska shaqosiinta, waxaa waajib ku ah shirkadda/hay'adda in ay shaqaalaha u diyaariyaan dukumintiga dhoofka iyo goobtii ay ka shaqeyn lahaayeen ugu badnaan Soddon (30) Maalmood gudahood.

35.2 Sida ku cad farqadda sare ee (35.1) ee habraacaan, haddii hay'adda /shirkadda ku diyaarin weyso shaqaalaha muddadii loo qabtay, waxaa waajib ku ah in ay soo wargeliso Wasaaradda, sabab Maangal ah oo keentay dib u dhacaas

35.3 Hay'ad / shirkad kasta waxaa waajib ku ah in ay ka diiwangaliso safaaradaha Soomaaliya ama xafiisyada Qunsuliyadaha ee Dalka la geynayo shaqaalaha / Xoogsatada, muddo 15 (Shan iyo Toban) maalmood gudohood,

35.4Shirkad/Hay'ad kasta oo u dirta shaqaale Soomaaliyeed shaqosiin dibadeed, waxaa waajib ku ah in ay hubiso in loo sameeyay: rukhsadii shaqada, rukhsadii degaanka, warbixin buuxdana la wadaagto xaaladda shaqaalaas la dhoofiyay Wasaaradda muddo 30 maalmood gudahood.

CUTUBKA SHANAAD

XADGUDUBYADA IYO CABASHOOYINKA SHAQAALAHA

QEYBTA KOOWAAD

Xadgudubyada ay ku kacaan Shirkadaha/Hay'adaha iyo Tallaabooyinka.

36. Xadgudubyada

Khaladaadka iyo sharci darrada soo socda, waxay keenayaan xannibaad ama ka joojin Rukhsadda:

b. Hor istaagid iyo carqaladeyn ku aaddan howlaha Baaraha Shaqada ee Wasaaradda u xilsaartay "Baarista shaqada"

t. Shirkad/hey'ad in ay iska Magacawdo Maareeye guud, xubnaha guddiga Maamulka, ama ay qoroto shaqaale, iyada oo aan la soo wargelinin Wasaaradda.

j. Shirkad/hey'ad in ay qoroto shaqaale heerkooda aqooneed ka hooseyo D/ga hoose/Dhexe / sare iyo kuwa aan haysan shahaaddada kartida xirfadda, farsamada, Aqoonta (Certificate of Occupational Competence) oo ay bixisay xarun Jaamacad Wasaaradda ay aqoonsan tahay

x. Shirkadda/hay'adda in ay saameyso, kuna qasabto loo shaqeeyaha in uusan qorin ama xulan shaqaale kale oo aan ahayn kuwa Hay'addooda/Shirkaddooda u diiwaan gashan.

Kh. Shirkadda/hay'adda fulin weysa in ay saxdo xadgudubyo shaqaale oo ay horay u gashay sida: Xuquuqda Shaqaale, Badbaadada iyo sharafta/karaamadooda Shaqaaalaha Soomaaliyeed.

d. Shirkadda/hay'adda fulin weysa in ay diyaariso shaqaalaha la dhoofinaya waqtigii sharciga ahaa ee loo qabtay (iyadoo aaney jirin sabab macquul ah)

r. Shirkadda/hay'adda in ay tixgelinin amarrada iyo Ogeysiisyada ay soo saarto Wasaaradda ama ay fulin weysa in ay raacdo habraacan.

s.Shirkadda/Hey'adda Fulin weysa in ay u soo gudbiso Wasaaradda waqti haboon warbixinnada la xiriirta shaqaalihii la diyaariyay si ay u dhoofaan iyo Jagooyinkooda.

Sh. Shirkadda/Hay'adda Fulin weysa in ay u soo gudbiso warbixinnadda joogtada ah ee ku saabsan: liiska shaqaalaha /xoogsatada ay shaqadooda dhammaatay sabab kasta ha ahaatee iyo sido kale war bixinnadda kale iyo caddeymaha ay Wasaaradda weydiiso.

Dh. Shirkadda/Hey'adda Fulin weysa in Nuqul Rukhsaddeeda ay ku dhejiso/surto xafiiskeeda gaar ahaan meel muuqata oo aan qarsoomi Karin, lana wada arki karo.

c. Shirkadda/Hey'adda fulin weysa gudashada adeeg munaasib ku ah, gaar ahaan adeegga iyo howlaha ku xusan qodobbada habracaan.

g. Shirkaddii/Hay'addii xannibaad ku sameysa ama ay ka hayso mushaarka shaqaalaha xoogsatada ama lacagaha ay shaqaalaha / Xoogsatada ku soo dirsadeen magaca shirkadda/hey'adda.

f. Shirkad/hey'ad ma ka qaadi karto wax kharash ah shaqaalaha dhoofaya, sabab kasta ha ahaatee, waxaa mas'uuliyadda qaadaya Maamulka Shirkadda/hey'adda.

q. Shirkadda / Hay'adda Fulin weysa in ay sameysa hanuunin guud iyo talo siin adeeg shaqaalaha/xoogsatada gaar ahaan safarkooda ka hor, shaqaalahaas oo loo diyaariyay shaqosiin dibadeed.

k. Shirkadda/Hay'adda Fulin weysa in ay in ay u hoggaansanto, isla markaana ay fuliso arrimaha ku tilmaaman, lana xiriirta qodobka (35) ee habraacaan iyo Adeegga Guud.

l. Shirkadda/Hay'adda fulin weysa in ay si deg deg ah u hubiso, ka dibna ay warbixin tifaftiran u soo gudbiso Wasaaradda gaar ahaan dhanka shaqaalaha/xoogsatada oo si daran dhaawac u ah ama geeriyooday, iyadoo ay shirkadda/hay'adda laga rabay in ay soo raaciyaan warbixintooda, sababaha keenay dhaawaca ama geerida iyo tallabooyinka ay hore u soo qaadeen.

37. Noocyada Sharci Darrada iyo Khaladaadka:

Qodobbada soo socda ee khaladaadka iyo sharci darrada ah waxay kallifayaan baabi'nta iyo burinta Rukhsadda shirkadda/hay'adda haddii:

b. Ay si toos ah ama si dadban ugu howlan yahay milkiilaha shirkad / Hay'add Maareeyaha guud ama shqaalaha howlo ay leedahay hay'ad / Shirkad kale oo haysato Rukhsad u gaar ah, kana yahay Maareeye ama Shaqaale shirkad dhoofka ka shaqeeysa (Travel Agency) ama Maareynta xafiiska tikidka duullimaadyada sameeya.

t. Shirkadda/Hay'adda fulin weysa in ay cusbooneysiiso Rukhsadeeda Muddada ku xusan faqradda (30.2) ee habraacaan iyo Adeegga Guud.

j. Shirkadda/Hay'adda ay qorto, diyaariso, ayna dhoofiso shaqaale da'dooda ka yar tahay (18) sano.

x. Hay'adda/Shirkadda ay haysato ama ay cusbooneysiiso Rukhsad ku saleysan dokumenti Been Abuur

kh. Shirkadda/Hay'ad ay Qorto, shaqaaleysiiso ama ay u dhoofiso shaqaalaha meel aysan ka jirin heshiis laba geesood ah oo u dhaxeeya Jumhuuriyadda federaaka Soomaaliya (JFS) iyo dalka la geynayo shaqaalaha ama meel ay Wasaaradda hore u mamnuucday in loo dhoofiyo shaqaalaha/xoogsatada Soomaaliyeed.

d. Shirkadda/Heyad ay u qorto ama ay u dhoofiso shaqaale meel ka shaqeynteeda ay si dadban u saameyneysa caafimaadka guud ee shaqaalaha, damiirkooda ama dhaawaceysa sumcadda, sharafta iyo muuqaalka guud ee dalka.

r. Shirkad/Hey'ad ay wareejiso ama ay u badasho Rukhsadeeda lahaanshaha shirkadd/hay'adda kale waa ku xad gudubka uu tilmaamaya sharci darrada habraacaan, maadaama Wasaaradda aanay hore ula soconin, laguna soo wargelinin.

s. Shirkadda/Hay'adda ay qabato lacag caddaan ah ama aan aheyn ee uu bixiyo/dhiibo shaqaale, taasoo bedelkeeda noqoneysa u fududeynta shaqaale shaqo siin dibadeed, waxaa la marinayaa Tallaabo Anshax marin Qofka iyo Shirkada/hay'ad intaba

sh. Shirkad/Hay'ad ay u dhoofiso ama ay diyaariso shaqaale ka hor inta ay shirkadda/hay'adda aysan ka helin oggolaansho Wasaaradda heshiiska shaqo siineed.

Dh. Shirkad/Hay'ad ay u dhoofiso shaqaale halkii loogu tala galay meel aan ahayn oo aan ku xusneyn heshiiskii shaqo siinta shaqaalaha/Xoogsatada Soomaaliyeed.

c. Shirkad/Hay'ad ay ku meeleyso shaqaale loo shaqeye kale oo aan ahayn loo shaqeeyihii lagu xusay heshiiskii shaqosiinta oo ay hore u oggolaatay Wasaaradda.

g. Shirkad/Hay'ad ay u soo bandhigto oggolaanshao la'aan, ayna adeegsato qoraallo ama ay Sameyso xayeesiin si ay u diyaariso, una dhoofiso shaqaale shaqosiin Dibadeed.

f. Ha'y'ad / Shirkad sameyso isku baddelid ama is waydaarin heshiiskii shaqosiinta oo ay hore Wasaaradda ugu oggolaatay mid kale, iyadoo kan dambe aan oggalaansho, wargelin iyo aqoonsi midna ka helin wasaaradda.

q. Shirkada/hay'ad ay ka hayso ama ay ka xannibto Dukumentiyada Safarka iyo macluumaadka kale shaqaalaha ama xoogsatada ka hor ama ka dib dhoofkooda

k. Shirkadda/Hay'ad ay sameyso been abuur wayn ama ay badasho Dukumentiga Safarka shaqaalaha / Xoogsatada Soomaaliyeed

l. Shirkad/Hay'ad ay jujuubid iyo khasbid ku sameyso shaqaalaha si ay ula wareegto ama ka faa'iadeysato xuquuqda iyo dheefta kale, taas oo ay ku jirto khayaano, diidmo, handadaad iyo cabsi gelin.

38. Talaabooyinka, Xaaladaha iyo Halbeegyada ku Meelgaarka ah:

38.1 Wasaaradda ma ansaxin doonta heshiis shaqo kasta oo ay soo gudbisay hay'ad/shirkad oo aan wali jawaab celin macquul ah ka keenin, dacwadda loo haysto oo ahayd ku xadgudubka qodobbada habracaan Guud iyo tusaalooyinka uu bixiyo xafiiska shaqosiinta dibadda ee shaqaalaha/xoogsatada Soomaaliyeed

38.2 Wasaaradda Waxey hakin, iyo dib u dhigid ku sameynsaa cusbooneysiinta Rukhsadda Hay'ad/Shirkad jawaab laga sugaayay (aan la keenin ilaa jawaab buuxda laga helaayo), kuna saleysan qodobbada soo socda:

b. Haddii ay hay'adda / shirkadda ku fulin weyso iney keento jawaab celinta dacwadda laga sugaayay oo ay hore u guddoontay / heshay si rasmi ah.

t. Haddii ay weli sii socdaan howlaha hay'ada/Shirkadda, kuwaasoo keenay xadgudubyo dheeri ah ama dhiigmiirad loo geystay shaqaalaha / xoogsatada, marka ay shaqo qorista socoto, ama si dadban u saameyneysa xiriirka dalka uu la leeyahay dalalka kale ama ay ka hor imaaneysa danta guud ee Qaranka

j. Haddii ay jiraan Caddeymo dhab ah oo ku aaddan ku xadgudubka habraacaan guud iyo tusaalooyinka Wasaaradda ay soo saarto mar kasta.

39. Tallaabooyinka Maamuleed:

39.1 Haddii ay Caddaato in hay'adda / Shirkadda ay gashay khaladaadka iyo sharci darrada ku xusan farqadda (37) ee habraacaan, waxay keeneysaa:

b. In Rukhsadda la xannibo, lana hakiyo muddo sadex (3) Bilood ah haddii xadgudubka uu yahay markii kowaad.

t. In Rukhsadda laga hakiyo, lana xannibo muddo lix (6) Bilooad haddii xadgudubka yahay markii labaad.

j. In Rukhsadda laga hakiyo lana xannibo muddo sanad ah (12) Bilooad haddii xadgudubka yahay markii sadaxaad.

39.2 Haddii Hay'ad/Shirkad ay sameyso kuna xadgudubto qodobka (37) ee habraacaan guud markii Affaraad (4), waxay shirkadda/Hay'adda muteysaneysaa in Rukhsadeeda la Buriyo, lana tirtiro.

40. Natiijada iyo Cawaaqibka Fal Sharci daro ah ee jojinta ama Burinta (tirtiridda) Rukhsadda

40.1 Shirkad/Hay'ad kasta oo Rukhsadda hore looga hakiyay ama la Baab'iyay, waxay si Buuxda u joojinaysaa dhamman adeegga howlaha shaqosiinta Dibadda ee Shaqaalaha / Xoogsatadda Soomaaliyeed.

40.2 Hay'addii/shirkaddii Rukhsadeeda la baab'iyay, lana tirtiray waxaa waajib ku ah in muddo Todobaad (7) ah ay ku soo celiso Rukhsadeeda, una soo gudbiso xafiiska qaabilsan shaqsiinta Dibadda shaqaalaha Soomaaliyeed ee Wasaaradda.

40.3 Shirkaddii /hay'addii ay Wasaaradda ka baabi'say Asalka Rukhsadeeda sababo jiro awgood, waxaa waajib ah in arrinta Baabi'inta Rukhsad si habboon lagu baahiyo, lagana sheego Qalabka warbaahinta Dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

40.4 Hakinta iyo baabi'inta Rukhsadda, kama saamaxayso Hay'adda / Shirkadda mas'uuliyadda ka jawaabidda waydiimaha sharciyeed ee la xiriirta xaaladda guud ee shaqaalaha ay dibadda u dhoofisay/u dirtay.

41. Gudbinta Cabashooyinka/Dacwadaha

41.1 Shaqaale kasta oo dhibbane ah ama wakiilkiisa rasmiga ah, waxaa u furan ama u bannaan in ay u soo gudbiyaan Af ama qoraal ahaan dacwaddooda ama cabashadooda Wasaaradda. Cabashadooda waa in ay ahaataa mid lagu xadgudbay Aragtida habraacaan iyo shuruucda kale ee dalka oo munaasib ah.

41.2 Cabashada ku xusan farqadda (41.1) ee sare, haddii qofka shaqaalaha ah ku soo gudbiyo Oraah ahaan, Sargaalka Wasaaradda ee cabashoyinka qaabilsan, wuxuu dhibanaha ama wakiilkiisa u faahfaahinayaa habraaca dacwad gudbinta si iyadoo qoraal ah ugu soo gudbisto Wasaaradda.

41.3 Wasaaradda, markii ay daraasad ku sameyso qoraalka dacwadooda / cabtaha iyo warbixinnada kale oo la xiriirta arrinkan, Wasaaradda waxay marsiineysaa nidaamka uu tilmaamaya habraacan, iyo xeerka shaqada Soomaaliyeed (Labour Code) ee Dhaqan galka ah.

42.Nuxurka Cabashada / Dacwadda

Cabashada / dacwadda shaqaalaha ay Qabaan waa iney ahaataa mid waafaqsan Qoddobka (41) ee sare ku xusan, iyadoo wadata faahfaahin Dheeraad ah oo ku saleysan qodobada hoos ku qoran:

b. Magaca iyo ciwaanka cabtaha oo dhameystiran

t. Magaca iyo Cinwaanka shirkadda / hay'adda Dacwadda/Cabashada laga soo gudbiyay

j. Dabeecadda dacwadda, iyo sababta dhabta ah ee keentay dacwadda/ Cabashada.

x. Iyo Caddeymo kale oo loo baahan karo oo dheeri ah haddii ay jiraan.

43. Dhageysiga Cabashada/Dacwadda

43.1 Wasaaradda waxey fureysaa Gal dacwadeed/cabasho waafaqsan Qoddobka (41) ee habraacaan, taas oo ay muhiim tahay in dacwaddaha in la dhageysto, lana baaro Cabashada.

43.2 Wasaaradda Markii ay hesho arjiga dacwadda/Cabashada, waxay Soo saareysaa ammarka u yeeridda Shirkadda/hay'adda, waxaana lagu lifaaqayaa nuqulka cabashada/dacwoodaha, kuwaas oo u fududeynaya Hay'adda / Shirkadda (Dacweysanaha) in ay la yimaadaan Jawaab celin, muddo dhan Toban (10) maalmood gudahooda, isla markaana ay isku difaacaan.

43.3 Shirkadii/Hey'addii fulin weysa ama wakiilkeeda Rasmiga uu–hoggaansami waayo Amarka soo gudbinta qoraalkiisa/jawaabtiisa uu iskaga difaacaya, kana jawaabaya dacwadda uu cabtaha soo gudbiyey sida ay tilmaamaysa warqadda u yeeridda iyo lifaaqyadeeda ku xusan Qoddobka (43) ee habraacan.

43.4 Haddii ay timaado dib uga noqosho dacwadda/cabashada dhanka dacwoodaha sabab kastaba ha yeelatee, muddo labo todobaad (14 beri) gudahooda, waxaa dacwoodaha laga rabaa inuu Wasaradda u soo gudbiyo qoraal uu ku caddeenayo, dib ula noqoshadiisa dacwadda isla markaana ay noqotaa mid maan gal ah sababaha ku kallifay in uu sameeyo arintaas.

43.5 Wasaaradda waxay diiwaan galineysaa ka noqoshada dacwadda ee cabtaha, waxaana loo wareejinayaa dukumintiga dacwadda oo dhamaystiran galka yaalla xusuus dhowrka guud ee xafiiska Wasaaradda, kuna aaddan arrimaha shaqosiinta dibadda ee shaqaalaha Soomaliyeed

44. **Amarka Fulinta go'aanka**

Wasaaradda waxay ku soo saareysaa amarka fulinta hay'adda /shirkadda Jawaabta laga sugayay in ay fuliso go'aanka sida ku xusan qodobka (43) ee habraacan iyo Adeegga Guud.

44.1 Shirkadda/hey'adda waa in ay fuliso amarka iyo go'aannada wasaaradda ay soo saartay muddo labo todobaad (14) maalmood gudahooda.

CUTUBKA LIXAAD

ADEEGGA DARYEELKA

QEYBTA KOOWAAD

Dammaanad Maaliyadeed iyo Ceymiska

45. Dammanadda Maaliyedeed

45.1 Shirkad/hey'ad kasta ee shaqosiin dibadeed, waa in ay Dhigtaa (Deposit) lacag rahan ah oo dhan Shillin Soomaali una dhigma US $ 25.000 (Labaatan iyo Shan kun US Dollar) xisaab xiran oo ka furan Banki Soomaliyeed oo la aqoonsan

yahay, waxaana lagu ilaalinayaa lacagtaas xuquuqda iyo badbaadinta Shaqaalaha/xoogsatada ah Naftiisa iyo Maalkiisa.

45.2 Qadarka lacagta la dhigay xisaabta xiran ee Bankiga, lagama saari karo

xisaabta haddii aan oggolaansho hore laga helin qoraal Rasmi ah Wasaaradda.

45.3 Haddii ay shirkadda/hay'adda ay u hogaasami weydo in ay gudato waajibkeeda ku xusan Qoddobka (49) ee habracaan, Wasaaraddu waxey amreysaa bixinta kharashka keenista Marxuumka iyo agabkiisa in laga bixiyo lacagta Rahanka aheyd.

46. Ceymis Gelin Shaqaale

46.1 Shirkad/hey'ad kasta, waxaa waajib ku ah in ay geliso shaqaalaha/xoogsatada

loo qaatay shaqosiin dibadeed ceymis caafimaad, nololeed iyo naafinamo,

46.2 Hay'ad/shirkad kasta waa in ay u soo gudbisaa Wasaaradda Nuqulka heshiiska

Shaqo siinta oo dhammeystiran iyo siyaasadda ceymiska shaqaale (Insurance Policy Document).

QEYBTA LABAAD

Kaalmada la siiyo shaqaalaha

47. Mas'uuliyadda

47.1 Wasaaradda iyo Wasaaradda Arrimaha Dibadda ayey saran tahay mas'uuliyadda xaqiijinta iyo ilaalinta xuquuqda, badbaadada, sharafta iyo karaamadda shaqaalaha/xoogsatada helay shaqo-siin dibadeed iyagoo xushmeysan.

47.2 Hay'ad/Shirkad kasta, waxaa saran waajibaad ku aaddan baraarujinta loo shaqeeyaha, inuu ixtiraamo ama Qiimeeyo heshiiska shaqosiinta shaqaalaha/xoogsatada ku guuleysatay iney hesho shaqosiin dibadeed.

48. Xoojinta Waxqabadka

48.1 Wasaaradda, iyadoo gudaneysa waajibaadkeeda shaqo waxay markasta xoojineysaa gacansiinnta shaqaalaha si cabashadooda wax looga qabto, gaar ahaan arrinta khuseyso xoogsatada/shaqaalaha helay fursad shaqosiin dibadeed.

48.2 Wasaaradda iyadoo kaashaneysa meelaha ay si toos ah u khuseyso ee arrimaha shaqaalaha, waxay ku dadaali doontaa in isdhaxgal xooggan ay ka abuurto shaqaalaha Soomaaliyeed dhexdooda guud ahaan, gaar ahaanna shaqaaalaha fursadda shaqosiinta dibadeed helay. Wasaaradda oo ka duuleyso habraacaan iyo Adeegga Guud, waxay faahfaahin dheeraad ah ka bixin doontaa xaaladdaan, ahmiyadda ay leedahay awgeed.

48.3 Wasaaradda, waxay siin doontaa caawinaad iyo talo sharci shaqaalaha dhibaatada ku soo gaartay muddadii uu jiray xiriirka shaqosiinta Dibadda.

49. La socod ka Fasaxyada Shaqaalaha

Shaqaale/xoogsade kasta ee dalka ku imaanayo fasax gaaban waa inuu inta aanu soo dhoofin iska soo diiwaan galiyaa xafiiska ku qeybsanaha arrimaha shaqda ee Safaaradda dalka uu ka shaqeeyo.

QEYBTA SADAXAAD

Hanaanka Xallinta khilaafaadka iyo dib u soo celinta shaqaaalaha

50. Khilaafaadka ka dhax dhaca shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha ee dalka shisheeya ee shaqaaluhu ka shaqeeyo waxaa lagu xallinaayaa sida soo socoto:

50.1 Dhexdhexaadinta

50.2 Shaqaalaha iyo loo shaqeeyuhu waxaa u furan in ay isla xushaan dhaxdhaxaadiye ay ku kalsoon yihiin si loo xaliyo khilaafka ka dhax jira.

50.3 Haddii dhaxdhaxaadintu labada dhinac midkood ku qanci waayo waxaa arrinta loo raacayaa nidaamka xallinta khilaafaadka ee dalka ay joogaan.

50.4 Haddii nidaamka dhexdhexaadinta khilaafaadka dalkaas lagu xallinwaayo waxaa u furan labada dhinac in ay Maxakamadda ay khuseyso ee dalkaas kudhammeystaan.

50.5 Wasaaradda shaqada iyo arrimaha Bulshada waxaa ugu wakiil ah ku qeybsanaha arrimaha shaqada/safaaradaha JFS in ay la socdaan khilaafaadka shaqada ee dhaxmara Shaqaalaha Soomaaliyeed iyo loo shaqeyaasha.

51. Dib u soo dhoofinta Shaqaalaha / Xoogsatadda

51.1 Qof kasta oo shaqaalaha ah, xaaladaha soo socda haddii ay ku yimaadaan, loo shaqeeyaha waxaa waajib ku ah in shaqaalahaas iyo agabkiisa shakhsiga ah uu dib ugu soo celiyo Dalka, isagoo bixinaya wixii kharash ah ee la xariira dib ugu soocelintooda:

1. Heshiiska shaqada oo dhamaaday
2. Geeri ku timid shaqale, iyadoo la soo raacinayo:
    b) Shahaadada Geerida (Death Certificate)
    t) Codsi ka yimaada ehelkiisa in loo keeno Marxuumka
    j) Ehelkiisa oggolaado in lagu Aaso (Duugo) meesha uu ku geeriyooday
3. Loo shaqeeyuhu ku qanciwaayo shaqadiisa ama ka maarmo
4. Soo gaara Dhaawac ama jiro halis ah oo aan daawo laheyn (cadayn dhaqtarna ay la socoto).
5. Maxkamad ku xukunto shaqaaluhu in wadankiisa lagu soo celiyo dambi ama anshax xumo dardeed

51.2 Howlaha dib u soo dhoofinta iyo habraacyada la xirriira, waa in ay ku soo dhammadaan muddo (15) Shan iyo Toban maalmood gudahood.

QEYBTA AFARAAD

Xadgudubyada loo Shaqeeyaha, Wakiillada Hay'adda/Shirkadda Shaqaalaha iyo Halbeegyada Munaasibka ah.

52. Xadgudubyada ay sameeyaan loo shaqeeyaha iyo wakiilka Hay'adda / Shirkadda:

Xadgudubyada soo socda ayaa ku filan in la fuliyo halbeegga munaasibka ah ee ka dhanka ah loo shaqeeyaha ama wakiilka hay'adda/shirkadda, waana kuwa soo socda:

52.1 U hogaansanaan la'aan fulinta gudashada waajibkiisa si waafaqsan heshiiska shaqosiinta.

52.2 Fashal ku yimaado wakiilka Shirkadda/hay'adda ee gudashada waajibkiisa, Maadaama uu yahay wakiil loo shaqeeye.

52.3 Ka hayn ama u diidid shaqaalaha dokumintiga Socdaalka oo sharciyeysan ee ay xaqa u leeyihiin Safarkooda.

52.4 Ka hakin shaqaalaha mushaarkooda iyo lacagaha kale (Dheefta) uu xaqa u leeyahay

52.5 Wax ka qabasho la'aanta dhaawacyada culus, dhibaato caafimaad darro ama geeri ku timaada shaqaalaha/Xoogsatada Soomaaliyeed.

52.6 Sameynta fal keenaya xadgudub ku aaddan sharafta, karaamada iyo moraalka shaqaalaha/xoogsatada Soomaaliyeed.

52.7 Sameynta xadgudub jinsi ah ee shaqaalaha / xoogsatada Soomaaliyeed.

52.8 Fulinta si sharci darro ah oo aan waafaqsaneyn qodobbada habraacaan guud iyo tusaalooyinka Wasaaradda mar kasta ka soo baxa ee ku aaddan shaqo siinta dibadda.

53. Natiijada sharci ee ku saleysan go'aan Qaadashada:

Wasaaradda, Waxey sameyn doontaa baaris iyo dabagal ku aaddan cabashada ay qabaan shaqaalaha gaar ahaan dhanka loo shaqeeyayaasha ama hay'adda/shirkadda, kuwaas oo keenaya ama ka dhalan kara natiijooyinka soo socda:

53.1 In loo shaqeeyaha laga mamnuuco inuu ka shaqasiiyo shaqaale ama uu ka abuuro fursado shaqo oo cusub dalka Soomaaliya.

53.2 In wakiilladda hay'adda/shirkadda laga mamnuuco in ay ka qeyb qaataan howlaha shaqosiinta dibadda ee Somaaliya.

53.3 In loo shaqeeyaha ama wakiilka hay'adda/shirkadda loo qabsan karo, una qoolan yahay inuu bixiyo magdhaw macquul ah oo wafaqsan sharci darrada uu galay, sida sare ku xusan ee qodobka (50) ee habraacan iyo Adeegga Guud.

54. Sharci darradda ay ku kacaan shaqaalaha:

Qodobbada soo socda ee sharci darrada ah ayaa ku filan in la fuliyo halbeegga munaasibka ah oo ka dhan ah shaqaalaha ku kaca:

54.1 Fulin la'aan ku timaada shaqaalaha in ay fuliyaan waajibaadkooda shaqo ee lagula heshiiyay, kuna xusan heshiishkooda shaqosiinta ee ay hore u saxiixeen.

54.2 In uu sameeyo fal dambiyeed mudan in ciqaab la mariyo oo ay qabaan shuruucda dalka Soomaaliya iyo kuwa dalka ay u shaqo tagayaan (Gudaha iyo Dibadda).

54.3 Fulin la'aan ku timaada ixtiraam la'aanta Diinta, dhaqanka ama caadooyinka soo jireenka ah ee dalka qaabilay shaqaalaha/xoogsatada Soomaaliyeed.

54.4 In qofka shaqaalaha uu soo bandhigo dokumentiyo been abuur ah, marka uu socdo habraaca shaqosiinta.

54.5 In qofka shaqaalaha uu si deg deg u joojiyo/ka baxa heshiiska shaqo siinta, sabab aan macquul ahayn oo aan jirin.

55. Tallaabooyinka Anshax Marin ee Shaqaalaha:

Iyadoo la taxgelinaayo nidaamka guud ee habraacan shaqosiinta dibadda ee shaqaalaha si waafaqsan sharuucda munaasabka, sidaas dardeed waxaa haboon ama mudan in la dabaqo, laguna qaado talaabooyinka iyo halbeegyada maamuleed ee soo socda:

55.1. Shaqaalaha sharci daro sameeyaa marka kowaad waxaa la siinayaa diginin Af iyo qoraal ah loona gelinaaya galkiisa shaqosiinta ee Wasaaradda.

55.2 Haddii ay sharci darrada la galay ay tahay markii labaad, waxaa shaqaalaha laga xannibayaa shaqosiinta dibadda muddo Saddax (3) Bilood ah oo xariir ah.

55.3 Haddii ay sharci darrada la falay ay tahay markii sedexaad, waxaa shaqaalaha si buuxda oo joogta ah looga rebayaa ka qeyb qaaadashada tartanka shaqosiinta dibaddda Shaqaalaha / xoogsatada Soomaaliyeed muddo Lix (6) Bilood ah.

55.4 Haddi shaqaalaha sharci darrada uu ku kacay uusan ku qanacsanayn talaabooyinka maamul ee sare ku xusan farqaddaha (53.2. 53.3) midkood waxaa u bannaan inuu cabashadiisa u gudubsado Maxkamadda ay khuseyso.

CUTUBKA TODOBAAD

QODOBBO KALA DUWAN

56. Go'aaminta Tirada Hay'adaha/Shirkadaha Shaqosiinta iyo wakiilladooda

Wasaaradda, waxay go'aamineysaaTirada Hay'adaha/Shirkadaha Shaqosiinta iyo wakiilladooda, isla markaana ku qeexeysaa Qoraal tilmaamaya inta wakiil ay ku yeelanayaan Dalka shaqaalaaha loo dhoofinaya iyagoo matalaya hay'adaha/Shirkadaha Soomaaliyeed ee ka shaqeeya shaqosiinta dibadda kuwaas oo heysta Rukhsad.

57. Xallinta Khilaafaadka Dacwadaha iyo Doodaha Shaqada

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada waxey abuuri doontaa xafiis u qaabilsan xallinta cabashada/dacwadda ka dhexdhalata loo shaqeeye iyo shaqaale, kuwaas oo ka dhaca dalka shaqaalaha shaqo loo geeyey, iyadoo lagu shaqeynaya habraacan iyo xeerarka shaqada ee labada dal ee heshiiska dhaxmaray.

58. Muddada Dacwada Shaqada

Dacwad kasta ee lagu sheeganaaayo xaquuq dhaaftay waqtigii loogu talgaley oo ah mudo Saddax (3) Sano ah sida uu qabo xeerka shaqada Soomaaliyeed, waxey noqoneysaa mid aan la aqbalin oo ay ku timid mudo dhaaf xaquuqdii la sheeganaayey laga billaabo maalintii khaladka ama xadgudubka la galay.

59. Awoodda Soo Saaridda Xeer Nidamiyaal Maamul

59.1 Wasiirka Wasaaradda wuxuu soo saari karaa amarro iyo tusaalooyin la xiriira habsami u fulinta habraacan, Adeegga Guud iyo xeerar Maamul.

60. Waajibaadka iyo iskaashiga

60.1 Shirkad/Hey'ad ama muwaadin kasta waxaa ku waajib ah inuu taageero sidii habraacan iyo Adeegga Guud u dhaqan geli lahaa.

61. Qodobbada Marxaladda kala Guurka:

61.1 Dacwooyinka la xiriirra shaqosiinta dibadda ee Soomaliya, kana horreysay soo bixidda habraacaan iyo Adeegga Guud, waxaa lagu xallinayaa, lana adeegsanaya xeeraka shaqada Soomaaliyeed (Somali Labour Code)

61.2 Shirkad/Hay'adkasta oo hore loo siiyay Rukhsadda adeegga shaqosiinta dibadda, waxaa u furan oo keliya in ay Rukhsad cusub soo Dalbadaan muddo laba (2) Bilood gudahooda ah, laga billaabo taariikhda uu habraacan dhaqangalo.

61.3 Hay'addii/Shirkaddii ku guuldarreysta in ay soo dalbato/sameysto Rukhsad cusub muddada ku xusan faqradda sare (61.2) ee habraacan, Rukhsaddii hore loo siiyay waxey noqoneysaa waxba kama jiraan.

61.4 Rukhsadihii shaqosiinta dibadda ee la bixiyey habraacan iyo adeegga guud ka hor waa waxba ka jiraan.

DHAMMAAD